**XEERKA N. 179 rep.**

## MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

## XOGHAYAHA GUUD

MARKUU ARKAY sharciga lambar 4 soona baxay nobembar 1951, n. 1031, kaas oo ansaxinaya heshiiska ilaalinta dhulka Soomaaliya ee hoos yimaada Maamulka Walaayada Talyaaniga oo siiyanaya awood fulineed oo buuxda;

MARKI UU ARKAY XEER n. 163 ku taariikheysan 23 diseembar 1951 kaas oo lagu asaasay dugsiga ummulisooyinka laguna ansixiyey nadaamka;

MARKII UU KU QANCAY baahida loo qabo in wax laga beddelo nadaamkaas iyada oo la tixgelinayo khibradda laga helay sannadkii ugu horreeyey ee ka shaqeysiinta dugsiga, iyo si loo qaabeeyo waxqabadka barnaamijka guud ee horumarinta aqoon xirfadeedka, oo uu soo diyaariyey Xafiiska Caafimaadka ee karti u leh;

MARKI UU DHEGEYSTAY aragtida Golaha Caafimaadka;

MARKI ARKAY qodobka n. 2 ee Xeerka No. 47 1950 kaasoo siinaayo Xoghayaha Guud in uu qabto howlaha loo igmaday Maareeyaha marka uu maqnaado;

**WUXUU XEERAYNAYAA:**

**Qod. 1.**

Qeybta "Nadaamka Dugsiga Umulisada" ayaa la oggolaaday.

**Qod. 2.**

Qodobka 2aad ee wareegtatda n.163 ee ku taariikheysan 23 disembar 1951 waa la tirtiray.

**Qod. 3.**

Kharashaadka la xiriira waxaa lagu dallici doonaa Cutubka. 63 ee sanadka hadda socda iyo cutubyada u dhigma ee sannad maaliyeedyada xiga;

Muqdisho, 29 nofembar 1952.

XOGHAYAHA GUUD
**Canino**

Arkay diiwaangelinta n. 912 ee R. D.
4 diseembar 1952.

## MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMALIA

## XEER NADAAMIYAHA “DUGSIGA UMMULISOOYINKA”

### Qod. 1.

“Dugsiga umulisooyinka” ayaa xaruntiisu tahay magaalada Muqdisho, kuna dhex yaala Isbitaalka Martiini. Madaxa dhakhaatiirta dhalmada iyo xannaanada haweenka ee Isbitaalka ayaa mas'uul ka ah.

### Qod. 2.

Dugsiga waxa uu leeyahay laba dowro sannadle ah, ayna soconeyso midwalba sagaal bilood, ayna xigto fasax saddex bilood ah. Caadi ahaan dowrooyinka waxa ay bilowdaan horraanta Janaayo.

Inka badan 15 arday laguma ogolaan karo dowrad kasta.

### Qod. 3.

Murashaxiinta soo codsa buuxiyana shuruudahan soo socda ayaa lagu qoraa Dugsiga:

a) — da'da waa in aaney ka yarayn 18 sano ayna ka badnayn 30.
b) — caafimaad qaba oo adag lehna ka hortagga dhibaatooyinka ka dhalan kara ama cudurrada ka hor istaagi kara howsha umulisada.
c) — anshax wanaagsan

### qod. 4.

Murashaxiinta marka la ogolaado Dugsiga waa inay ku gudbaan imtixaan dhaqan guud iyo ku habboonaanta.

Gudiga imtixaanka qaadaya, oo qiimentoodu tahay laguma noqdaan iyo kamadambeys, waxa uu ka kooban yahay Kormeeraha Caafimaadka - Guddoomiye - iyo laba xubnood kale oo ay suurtagal tahay in ay yihiin dhaqaatiir caafimaadka.

### Qod. 5.

Ardayda dugsiga umulisooyinka lagu qoro waxaa ku waajib ah in ay u adeegaan qaybta dhalmada. Maalin kasta oo adeeg dhabta ah, waxaa la siin doonaa gunno Sh. So. 2,50 ah, waa haddii aysan horeyba u ahayn shaqaale MTMS, taas oo markaa ay sii wadi doonaan helitaanka mushaar graaddada ay haystaan.

### Qod. 6.

Dhamaadka dowrada sanad kasta, ardaydu waa inay ku gudbaan imtixaanka barnaamijka waxbaridda ee la qabtay sanadka.

Dhamaadka dowrada labaad, ardayda ay cadaato inay ku haboon yihiin waxay heli doonaan shahaadada umulisada.

Gudiga imtixaanka qaadaya, oo qiimentoodu tahay laguma noqdaan iyo kamadambeys, waxa uu ka kooban yahay Kormeeraha Caafimaadka – Guddoomiye – Maamulaha Dugsiga umulisooyinka iyo xirfadle daryeel caafimaad oo uu magacaabo Madaxa Xafiiska Caafimaadka.

**Qod. 7.**

Ardayda aan ku guuleysan imtixaanka sanadlaha ah dhamaadka dowrada koowaad waa laga saarayaa dugsiga. Si kastaba ha noqotee, waxay ku xiran tahay guddiga imtixaanka inay soo jeediyaan in ay ku soo celiyaan dowrada iyada oo aan wax loo dhimin qodobka. 2 cutubka koowaad.

Ardayda aan ku guuleysan imtixaanka kama dambaysta ah ee dowrada labaad, waxaa laga yaabaa - marka ay ka gaaran xukun guddiga imtixaanka - in loo ogolaado inay ku celiyaan dowrada, iyada oo aan laga hor tagin habka ku xusan qodobka 2 cutubka koowaad.

**Qod. 8.**

Barnaamijka waxbarida ee dugsiga umulisooyinka waxaa ka mid ah:

**1) Sannadka koowaad:**

a) — Fikradaha guud ee howlgalka jirka, cudurrada guud iyo nadaafadda, iyo si gaar ah loo eegayo hooyada;
b) — habdhiska miskaha dumarka iyo nidaamyadeeda kala duwan;
c) — cilmiga iyo nadaamka jirka ee taranka;
d) — uurka caadiga ah, dhalmada iyo dhiigga dhalmada;
e) — barista sheybaarka ee sariirta ummusha;
f) — waajibaadka umulisada.

**2) Sannadka Labaad.**

a) — qaybaha muhiimk ah iyo barashada kala duwanaantooda;
b) — cudurrada uurleyda, dhalmada , dhiigga dhalmada, iyo nuujinta caadiga ah:
c) — ka hortagga cudurada faafa ee ilmaha dhasha iyo tixgalin gaar ah u leeyahay dhiigbaxa iyo jabtada iyo fikradaha guud ee cilmiga taranka iyo daryeelka ilmaha;
d) — habraaca hawlgalka ee loo oggol yahay umulisada iyo gargaarka degdegga ah ee umusha;
e) — Caawinaadda dhallaanka xagga cilmiga cudurada iyo u diyaar garowga qallinnada;
f) — dhayidda iyo maamulida daawa siinta.

Waxbaristu waa akhris ahaan iyo shaqo gacan ka qabad, had iyo jeer waxa lagu muujiyaa caddeymo.

**Qod. 9.**

Meelaynta waxbarida ayaa sida caadiga ah soconaysa hal sano waxaana loo dhiibaa Maareeyaha, markii uu arko soo jeedinta Maamulaha dowrada, ka dib marka uu dhageysto aragtida kormeeraha Caafimaadka.

**Qod. 10.**

Casharrada ayaa bixi doona iyada oo loo eegayo saacadaha shaxda kormeeraha Caafimaadka, ka dib soojeedinta Maamulaha Dugsiga.

Casharrada toddobaadka baxa kama badnaan karaan 12 ama ka yaraan karaan 10.

Macallimiinta waxaa looga baahan yahay inay buuxiyaan warbixinno kooban oo bil-bil ah. warbixinta waxaa loo gudbiyaa Maamulaha dowrada kaas oo ku sameyn doona badin una qeybinta ardayda.

**Qod. 11.**

Macallimiinta ayaa la siiyaa mushaar dhan Sh. So.12 saacad kasta oo shaqo dhab ah.

Maamulaha Dowrada ayaa lagu wareejiya saacado waxbarid usbuucii oo aan ka badnaan karin labo.

Xubnaha Guddiga Imtixaanaadka, ee lagu tilmaamay qodobka. 6, gunnadoodu waa Sh. So. 5 arday walba oo imtixaan laga qaado.

**Qod. 12.**

Taariikhda billowga iyo xiritaanka dowrad kasta oo sannadle ah waxaa go’aaminayo Madaxa Xafiiska Caafimaadka.

**Qod. 13.**

Kormeerka farsamada iyo edbinta ee dugsiga 'waxaa ku deeqa Kormeeraha Caafimaadka'.

Muqdisho, 26 Nofembar 1952.

XOGHAYAHA GUUD
**Canino**